Barnaamijka Ku Dhawaad Maalin oo Maamule Dugsi la noqonayo 'Principal for Almost a Day' waxay ganacsiyada, hoggaamiyeyaasha dugsiga siinaysaa fursad ay dadka kula wadaagaan fikradaha ku saabsan caawinta ardayda

Petra Callin, Emi Donis iyo Nate Waas Shull ayaa hayay farriimo badan oo la isbarbardhigo.

Callin, oo ah maamulaha Dugsiga Sare ee Madison, ayaa martigelisay Donis iyo Waas Shull Khamiistii, Oktoobar 12, iyada oo ay qayb ka ahayd dhacdada Ku Dhawaad Maalin oo Maamule Dugsi la noqonayo 'Principal for Almost a Day' (PFAD). Barnaamijku wuxuu ganacsiyada, hoggaamiyeyaasha dowladda iyo bulshada geliyaa booska dugsiyada sare ee dadweynaha ee Degaanka Multnomah, kuwaasi oo ay ku jiraan dhammaan dhismayaasha 79 ah ee Dugsiyada Dadweynaha Portland.

PFAD, uu gacanta ku hayo Urrurka All Hands Raised, wuxuu doonayaa in uu dhiso "fahamka, wacyi gelinta iyo iskaashiga u dhaxeeya hoggaamiyeyaasha dugsiga iyo bulshada."

Donis, oo ah qareen muddo dheer soo ahayd sargaalad fulinta u qaabilsan Precision Castparts Corp., ayaa dhageysatay Callin oo ka hadlaysay caqabadaha gaarka ah ee Madison, oo leh arday kala duwan (2015-16, boqolkiiba 34 oo Caddaan ah, boqolkiiba 24 oo ah Hisbaanik/Laatiino, boqolkiiba 16 oo ah Maraykanka Madow), hase yeeshee waxaa ka maqan qoysaska qotoda dheer ee ay leeyihiin dugsiyada sare ee kale ee PPS.

Donis waxay si weyn u maalgeshatay PPS, iyada loo leh mataano – wiil iyo gabar – dhigta Dugsiga Dhexe ee Robert Gray ka dib markii ay sii gudbeen Dugsiga Hoose ee Rieke. Bishii Luulyo waxay bilawday wareegii labaad ee socodka ee guddiga Urrurka All Hands (waxay ka soo shaqaysay lix sano oo hore, ka dibna laba sano ayay gees ka fadhiday, sida uu dhigayo sharcigu). Khamiistii waxay ahayd markii toddobaad ee ay ka qayb qaadanayso PFAD. Waxay sheegtay in mar kastaa ay u noqonayso waayo-aragnimo waxbarasho marka ay si dhow u fiiriso dugsiyada ka duwan kuwa ku yaala xaafaddeeda Koonfur-galbeed Portland.

"Waxaan dhihi lahaa waxaan helaa wacyi gelin iyo aragti hore oo toos ah oo ku saabsan caqabadaha iyo fursadaha maalin kasta soo wajaha maamulayaasha dugsiga PPS," ayay sheegtay.

Urrurka All Hands Raised waxaa la bilaabay 1994-kii isaga oo ahaa Urur Dugsiyada Dadweynaha Portland leeyihiin iyada oo ujeedadiisu ahayd u doodista "waxbarasho fiican oo loo siman yahay oo loogu talagalay oo dhammaan ardayda." Waxay ku baahday lix dugsiyada degmooyinka oo ka tirsan Degaanka Multnomah.

Khamiistii ka qayb qaatayaasha waxay ka kala yimaadeen ganacsiyo kala duwan, iyaga oo ka socday laga soo bilaabo dowladda ilaa laga gaarayo cayaaraha (Kooxaha Portland Timbers/Thorns oo saddex maamule oo sare ku darsaday dugsiyada PPS), laga soo bilaabo shirkadaha caanaha (Tillamook Cheese) ilaa laga gaarayo ururada maaliyaddeed (bangiyo badan ayaa la matalayay).

Donis, oo hada u shaqeysa Shirkadda Senior Aerospace SSP, ayaa waxaa Khamiistii ku soo biirtay Waas Shull, oo ah madaxweyne ku xigeenka dhanka iskaashiga ee All Hands. Callin ayaa iyaga u qaaday dhismaha dugsiga oo ku soo wareejisay, iyaga oo fiirinaya xarunta kulliyadda iyo xirfadda, maktabadda iyo shaybaarka qalabka iswada 'robotics lab' ee ay gacanta ku hayso Monica Gray. Intii ay hawsha wadeen, waxay ka wada hadleen qorshayaal lagu caawinayo ardayda.

Donis waxay xasuusatay arday ay la kulantay oo shaqo ka codsaday Precision Castparts, laakiin rumaystay sida nidaaamka codsiga ee internet-ka ugu adagyahay, xataa qareen khibrad u leh.

"Waxaan isdhahay, xataa ma raaci karo nidaamkan codsiga," ayay sheegtay Donis.

Waxay sidoo kale xasuusatay in loo sheegay intii lagu jiray wareysiga shaqada, oo ahayd ardayga oo wax badan hadlayay cayaaraha fiidiyoowga.

"Malaha waxaan u baahanahay in aan shaqo fiican qabano taasi oo ah in aad carruurta barto sida loo maro wareysiga," ayay sheegtay Callin.

Waas Shull waxay Callin u adeegsatay soo jiidashada dadka si loo dejiyo kulamo si ay uga caawiyaan dugsigu in uu helo siyaabaha aan muuqan isla markaana hal-abuur leh si loo daboolo baahiyihiisa qaarkood. Iyada oo la sugayo dib u cusboonaysiinta taasi oo la arki doono dugsiga oo muddo labo sano ah u wareegi doona dhismaha Marshall, dugsiga waxaa sidoo kale haysta caqabado kale oo dhanka qorshaynta ah.

Xarunta xirfadda, Donis waxay nuqulada qoraalka shaqo qorista noociisa oo kale ka codsatay shirkadda qaranka ee ku dhegisay meesha macluumaadka la isku dhaafsado 'bulletin board'. Waxay sheegtay in ay doonayso in ay Precision ka caawiso in ay samayso qoraal kaasi la mid ah oo lagu soo dhejiyo meesha macluumaadka la isku dhaafsado, iyada oo intaasi ku dartay in shirkaduhu ay wax badan ka qaban karaan si ay uga faa'iideystaan tayada ay leeyihiin dugsiyada PPS. Waxay qayb ka ahayd waxa iyada iyo ka qayb qaatayaasha kale PFAD waxa keenay booqashadooda.

"Waxaan u maleynayaa in ay aniga iga heleen aragti ganacsi marka la eego jawaabtayada ku aadan waxa aan aragno," ayay sheegtay. "Waan hubnaa in aanu maanta taasi samaynay, aan ka wada hadlay sida ganacsiyadu caawin karaan dugsiyada, isla markaana ganacsiyadu naftooda u caawin karaan, sababtoo ah waxay u baahan yihiin shaqaalaha. Waa sida aanu si wada jir ah ugu wada shaqayn karno iyada oo la iskaashanayo."

-Mike Tokito